

Somali



MINNESOTA

UNEMPLOYMENT INSURANCE

Buugyareha Macluumaadka

Waxa ay tahay in aad ka ogaato
ceymiska shaqa-la'aanta



27ka Oktoobar, 2024 ilaa 25ka Oktoobar, 2025



www.uimn.org

Codso manaafacaad, dalbo lacagahaaga, koontadaada kala soco — intarnetka ama khadka taleefanka (eeg bogagga 5, 8, iyo 9 oo ah jadwalka).



www.uimn.org

Calaamadi **Codsadeyaasha** ka dibna **Codso Manaafacaadka** ama **Soo-gal Koontadeyda**.




Magaalooyinka Mataanaha

iyo Nawaaxigooda: 651-296-3644

Minnesota Miyigeeda: 1-877-898-9090

Habka (TTY) dhagoolaha: 1-866-814-1252

Waan ku caawineynaa! La soo hadal
Wakiilka Adeegga Macmiisha Isniin ilaa
Jimce, 8-da ilaa 4:30 galabnimo



Magaalooyinka Mataanaha

iyo Nawaaxigooda: 651-296-3644

Minnesota Miyigeeda: 1-877-898-9090

Habka (TTY) dhagoolaha: 1-866-814-1252

1. Sheeg luuqaddaad rabto: **af Ingiriis, taabo 1, af Isbaanish, taabo 2, Af Moong, taabo 3, ama af Soomali, taabo 4.** Haddii aad rabto luuqad kale, taabo 1 oo raac waxyaabaha hoose si aad ula hadasho oo aad qof wakiil ah uga codsato turjubaan.
2. Qor **Sagaalkaaga Lambar:**
3. Geli **furehaaga** dabadeedna **taabo calaamadda afar-geeska #.** Haddii aan lagaa codsan in aad qorto furehaaga, **taabo 2,** ka dibna **taabo 0** si aad ula hadash qof wakiil ah.
4. **Taabo 2** oo dhageyso waxyaabo kale.
5. **Taabo 3** oo dhageyso su'aalo iyo jawabo guud. Si aad qof ula hadasho, **taabo 0.**
6. Haddii aad rabto turjubaan, u sheego qofka aad la hadasho.

Booqo www.uimn.org oo ka eego jawaabaha cusub ee su'aalaha caamka ah.

Liiska warbixinta Caymiska Shaqo la'aanta (UI)

- Codso sida ugu dhaqsida badan marka aad shaqo la'aan noqotid.
- Shaqo raadi oo u diyaar garow inaad ogolaatid.
- Codso lacata usbuuc kasta ilaa aad bilowdo shaqo buuxda.
- Xusuusnow furehaaga, qofna ha u sheegin, oo furehaaga ceymiska UI ha u isticmaalin meel kale.
- Akhriso buugyarehan.
- Ka soo jawaab macluumaad kasta oo lagaa soo codssado.
- Beddel cinwaankaaga guriga markaad guurto iyo markaad soo codsaneyso lacagtaada ceymiska shaqa-la'aanta.
- Taleefan ahaan kula soo xiriir Adeegga Macaamiisha ee UI haddii aad su'aalo qabto (eeg bogga 19-aad).

MIYAAD OGTAHAY...

...si aad u hesho lacagta ceymiska, waa in aad marka hore adigu soo sameysato codsi. Macluumaad dheeraad ah ka eego boggagga 8-aad iyo 9-aad.

...lacagta lama bixiyo toddobaadka koowaad? (eeg bogga 10-aad) Macluumaad dheeraad ah ka eego boggagga 10-aad.

Welcome to the Minnesota Unemployment Insurance (UI) Program

This is the official website of the Minnesota Unemployment Insurance Program, administered by the Department of Employment and Economic Development (DEED).

Select who you are:

APPLICANTS >>



Español

Hmoob

Somali

EMPLOYERS & AGENTS >>



www.uimn.org waa barta intarnetka ee rasmiga ah ee Barnaamijka Ceymiska Shaqa-la'aanta ee Minnesota.

Waxaad ka heleysaa jawaabaha su'aalahaas, iyo waxyaabo badan:

- Sidee baan u codsadaa?
- Sidee baan lacagta ku helayaa?
- Maxaa saameynaya manaafacaadkeyga?
- Maxaan u baahnahay in aan ogaado?
- Sidee baan racfaan ku qaadan karaa?

Daawo oo Dhageyso! Fiidiyowyo ah mowduucyada shaqa-la'aanta waxaa laga helayaa intarnetka.

Waa in aad ilaashato macluumaadkaaga shakhsiga ah.

Si degdeg u soo sheeg wixii khiyaamo ah oo aad la kulanto.

Nasiib darro, hadda aad ayaa la isaga xadaa aqoonsiga dadka. Haddii uu qof ah tuug helo macluumaadkaaga shakhsiga ah, magacaaga ayey u isticmaali karaan in ay ku furtaan koonto ah ceymiska shaq-la'aanta. Waxa ay sidaas u sameynayaan waa in ay xadaan lacagta Barnaamijka Ceymiska Shaqa-la'aanta.

Haddii uu buugyarehan kuugu yimid boostada, balse aadan soo codsan manaafacaad, fadlan barta internetka noogu soo sheeg in ay khiyaamo jirto. Waxaad foomka ka heli kartaa: www.uimn.org/fraud-report

Ka taxaddar qalinshubatada dadka khiyaama.

Qalinshubatada khiyaamada ah, tuugtu waxay diyaarsadaan boostooyin ah internetka ama taleefannada dadka. Dabadeedna farriimo ayey dadka ugu diraan internetka ama taleefankooda (sida sawirka dhinaca midig ka muuqda).

Farriimaha qalinshubatada badanaa waxay u ekaan karaan kuwa run ah oo meel sax ah ka yimid. Waxa ay badanaa dadka u sheegaan arrin degdeg ah in ay jiraan, sida

- “Khalad ama mushkilad ayaa ka jirta kadinkaaga internetka”
- “Codsigaagii lacagta ceymiska shaqa-la'aanta ma dhammeystirna”
- “Waxaad noqotay waa dhibbane la khiyaamay”



Farriimaha qalinshubatada badanaa waxaa la socda linki ama lifaaq. Mararka qaar linkiyada/lifaaqyada waa barnaamijyo xun oo lala soo dago oo khatar ah. Marar kale, linkiyada/lifaaqyada waxay ku geynayaan baro internet been ah oo ay dadka uga xadaan macluumaadkaaga shakhsiga ah.

Halkan ka akhriso talooyin aad naftaada uga difaaci karto qalinshubatada khiyaamada ah.

- Waa in aad **MAR KASTA** iska sii ogaato in ay been yihiin farriimaha qoraalka ah ama kuwa baraha bulshada ee ku saabsan ceymiska shaqa-la'aanta. Annagu **MARNA** dadka kulama xiriirno Facebook, Twitter, Instagram, ama farriimo qoran.
- Dadka marmar ayaan u dirnaa farriimo ah boostada internetka, laakiin farriimahaas **MARNA** kuma jiraan wax linkiyo ah. Ka taxaddar in aadan gujin wixii linkiyo ah oo aad ku hesho boostada intanetka.
- Haddii aad rabto inaad lacag codsato ama lacag lagu soo dirayo, **MAR KASTA** adigu si toos ah u soo gal barta caanka ah ee aan ku leenahay internetka www.uimn.org.
- Annagu **MARNA** taleefanka kuguma weydiin karno summaddaada, furehaaga, Sagaalkaaga Lambar, ama macluumaadka koontadaada bangiga.

Tusmada Qoraalka

Hordhac	4
Codsashada lacagta	5
Goorma ayaan codsadaa?	
Sidee baan u codsadaa?	
Ka warran haddii aan shaqa-la'aan u ahay sabab aan aheyn eryid?	
Adlgoo isticmaalaya furehaaga	6
Ka dib markaad codsato	7
Lacag intee ah ayaan heli doonaa?	
Codsiga lacagta lagu helayo	8 - 9
Goorma ayaan codsanayaa lacagta aan helayo?	
Goorma ayaan filan karaa lacag iigu horreysa?	10
Toddobaadka aan lacagta la helin	
Sidee baan lacagta ku helayaa?	11
Sidee bay u shaqeysaa habka koontada bangiga tooska ah?	
Sidee buu kaarka lacagta lagu qaato u shaqeeyaa?	
Noo soo sheeg xaalka shaqada markaad soo codsaneyso lacagta	12
Shaqooyinkee ayaa la iga rabaa in aan soo sheego?	
Sidee bay shaqadu u saameyneysaa lacagteyda?	13
Ka warran haddii ay toddobaad kasta kala duwan yihiin saacadaha aan shaqeeyo?	
Maxaa dhacaya haddii aan soo sheegi waayo saacado iyo lacagta aan shaqeeyey?	
Dakhliga saameynta ku yeelan kara lacagta	14
Fahmidda toddobaad kasta shuruudaha xaqa loogu yeelan kar	15
Maxaan u baahannahay inaan sameeyo isbuuc walba?	
Sidee bay in iskuul la dhigto u saameyneysaa lacagta la qaadanayo?	
Joojinta iyo bilaabidda lacagta la qaadanayo	16
Ka warran haddii aan shaqo ku laabto?	
Ka warran haddii ay mar kale shaqo la'aan igu dhacdo?	
Xayiraad ah in aan lacagta la helin	17
Canshuurta dakhliga, lacagta dheeraadka ah, xannaannada carruurta	
Caawimaadda Shaqa-helidda	18
Habka xiriirka adeega macaamiisha	19
Caawimaad ah helidda shaqo kale	20
Shaqa-raadinta intarnetka casharro ah eLearning	
Kaalmo dhaqaale iyo adeegyada bulshada	21
CareerForce - Caawimaadda Shaqa-raadiska	
& Shaqada Mustaqbalka	Gudaha bogga dambe

Hordhac

Buugyarehan waxaa ku qoran macluumaad muhiim ah oo ku saabsan lacagta ceymiska shaqa-la'aanta, sida:

- Sida loo codsanayo
- Sida loo go'aaminayo in xaq loo yeesho.
- Waxa la sameynayo toddobaad kasta si loo helo lacagta.

Macluumaadka buugyarehan waa si kooban lacagta ceymiska shaqa-la'aanta. Mowduuc kasta kuma qorna, kama jawaabayo su'aalaha oo dhan, ama laguma beddelan karo sharciga.

Adiga ayuu xil kaa saaran yahay in aad akhrisato buugyarehan iyo macluumaadka kale ee aad ka hesho Ceymiska Shaqa-la'aanta ee Minnesota.

Barnaamijka Ceymiska Shaqa-la'aanta waxaa maamulo Waaxda Hormarinta Shaqada iyo Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED). DEED waxa ay si bilaash ah ku caawisaa codsadeyaasha iyo goobaha shaqada marka ay qabaan su'aalo ku saabsan ceymiska shaqa-la'aanta.

Waa in aadan weligaa xafiis ama dad kale lacag ku siin in ay kugu caawiyaan ama kuu codsadaan lacagta ceymiska shaqa-la'aanta. Waa in aad sidoo ka feejignaato marka aad akhrisaneyso macluumaadka baraha xiriirka bulshada, oo aan badanaaba run ahayn.

Lacagta waxaa lagu maalgeliyaa canshuurta ay bixiyaan goobaha shaqada oo keliya. Canshuurta laga gooyo shaqaalaha mushaarkooda looma isticmaalo lacagta ceymiska shaqa-la'anta

Codsashada lacagta

Goorma ayaan codsadaa?

Soo codso lacagta isla toddobaadka ay kugu dhacdo shaqa-la'aanta ama ay kaa yaraadaan saacadahaaga shaqada.

Sidee baan u codsadaa?

Ku soo codso intarnetka ama taleefanka oo raac tilmaamaha iyo jadwalka hoose. Ka dib markaad soo codsato waxaa lagu soo dirayaa macluumaad ku saabsan lacagta iyo sida loo soo dalbado (eeg bogga 8-aad). Haddii aad lacagta xaq u leedahay, waxaa lagu soo xusuusin doonaa lacagat toddobaad kasta (eeg bogga 7-aad).

Intarnetka – Waxaad intarnetka ku soo codsan kartaa Axadda ilaa Jimcaha, 6-da ilaa 8-da fiidnimo.

Booqo www.uimn.org, guji **Codsadeyaasha** dabadeedna **Codso Lacagta**.

Taleefanka – Soo garaac Isniinta ilaa Jimcaha, 8-da ilaa 4:30 galabnimo. Dooro *Ingiriis, Isbaanish, Moong, ama Soomaali*. Haddii aad u baahan tahay luuqad kale, raac tilmaamaha ku qoran bogga 19-aad si aad ula hadasho qof shaqaale ah oo aad uga codsato turjubaan.

Magaalooyinka Mataanaha iyo Nawaaxigooda:	651-296-3644
Minnesota Miyigeeda:	1-877-898-9090
Habka (TTY) dhagoolaha:	1-866-814-1252

Ka warran haddii aan shaqa-la'aan u ahay sabab aan aheyn eryid?

Haddii aadan shaqo haysann sabab kasta oo aan aheyn shaqa-la'aa, sida uu dhigayo sharciga Minnesota waa in la raaco habraaca lagu go'aaminayo haddii aad lacagta xaq uu leedahay.

1. Inta uu socdo codsiga waxaan ku soo weydiineynaa su'aalo ku saabsan sababta aad shaqo la'aanta u tahay.
2. Waxaan isla su'aalaha weydiineynaa goobta shaqada.
3. Waxaan eegeynaa jawaabahaaga iyo jawaabaha goobta shaqada si loo go'aamiyo haddii aad lacagta xaq u leedahay.
4. Go'aanka waxaan u direynaa codsadaaha iyo goobta shaqada oo waxaa ku soo sheegi doonaa haddii aad lacagta xaq u leedahay. Go'aanka adiga ama goobtaadii shaqada ayaa racfaan ka qaadan kara.

Waxaa muhiim ah in lagaa helo macluumaad ku saabsan sida ay shaqadii kaaga dhammaatay. Haddii aan heli weyno macluumaad fiican, waxaa dhici karta in aanan soo go'aamin karin lacagtaada.

Isticmaalida furehaaga

Furehaaga iyo Sagaalkaaga Lambar waa sida la hubo ee aad ku heleyso lacagta aad qaadaneysa oo waxa ay kuu yihiin waa saxiixaaga shaashadda. Haddii aadan xusuusan karin furehaaga, waad beddelan kartaa.

Intarnetka ku beddelo furehaaga www.uimn.org

1. Guji **Codsadeyaasha** dabadeedna **Gal koontadeyda**.
2. Qeybta **Codsadeyaashii Hore** guji, **Hilmaamidda furehaaga** linkiga ah oo ka jawaab wixii lagu weydiiyo.
3. Haddaad hilmaantay jawaabta su'aashaada sirta ah, adeegso taleefanka ka dibna raac tilmaamaha hoos ku qoran.

Guji beddelo furahaada

1. Soo garaac taleefanka ku caawinaya:

Magaalooyinka Mataanaha iyo Nawaaxigooda:	651-296-3644
Minnesota Miyigeeda:	1-877-898-9090
Habka (TTY) dhagoolaha:	1-866-814-1252

2. Calaamadi luuqad.
3. Qor **Sagaalkaaga Lambar**. Marka lagu weydiiyo geli furehaaga, **taabo calaamadda afargeeska #**.
4. Ka jawaab **su'aal sir kuu ah** adigoo isticmaalaya taleefankaaga (xarfo gaaraya ilaa 8 xaraf) kadibna **taabo calaamada #**. Raac tilmaamaha soo baxaaya si aad eray sireedkaaga ubadasho.
 - Hadaadan faylka kuhaysan su'aashaada amaanka, waxaa agugu xirayaa wakiil shirkada kasocda. Haddii aad rabto turjubaan, u sheego qofka aad la hadasho.
 - Haddii aad hilmaantay jawaabta su'aashaada sirta ah, ka dib markaad dhowr jeer sheegto, waxaa si toos ah laguugu xirayaa qof kula hadla ama waxaad maqli doontaa; "Taabo lambar 2 si aad ula hadasho qof shaqaale ah." Haddii aad rabto turjubaan, u sheego qofka aad la hadasho.

Codsigaaga ka dib



Lacag intee ah ayaan heli doonaa?

Lacagtaad toddobaad kasta qaadaneyso waxay noqoneysaa **qiyaastii boqolkiiba 50** ka mid ah celceliska mushaarkaagii toddobaad kasta ee **ugu badnaan gobolka \$914**.

Waxaan boostada internetka laguugu soo dirayaa Go'aanka Lacagtaad Qaadaneysa toddobaad kasta iyo wadarta lacagtaada guud ee qaadan karto.

- **Go'aanku macnihiisa ma aha in aad si kasta iska qaadaneyso lacagta shaqa-la'aanta.**
- Waxaa boostada guriga laguugu soo dirayaa go'aan kale haddii loo baahdo in go'aan laga gaaro in aad lacagta xaq u leedahay.

Markaad soo codsaneyso lacagtaada

Goorma ayaan codsanayaa lacagta aan helayo?

- Waxaa khasab ah inaad lacagta soo codsato **toddobaad kasta oo aadan shaqeyn.**
- Soo codso lacagtaada haddii weli la go'aaminayo in aad lacagta xaq u leedahay ama haddii aad sugeyso racfaan ama go'aan.
- Toddobaadyo lacag ma qaadan kartid haddii aad wakhti sax ah ku soo codsan weydo.



Intarnetka ku soo codso lacagta aad qaadaneyso

Waxaad lacagta ku soo codsan kartaa intarnetka Axadda ilaa Jimcaha, 6-da aroornimo ilaa 8-da fiidnimo.

1. Booqo www.uimn.org
2. Guji **Codsadeyaasha** dabadeedna **Gal koontadaada**.
3. Koontadaada waxaad ku gashaa Sagaalkaaga Lambar iyo Furehaaga.
4. Guji Codso **Lacagtaad Qaadaneyso**.

Taleefanka ku soo codso lacagtaad qaadaneyso

Si aad taleefanka ugu soo codsato lacagta aad qaadaneyso, fadlan raac tilmaaha soo socda ee ku qoran bogga dambe.

Taleefanka ku soo codso lacagtaad qaadaneyso

Jadwalka hoose waa liiska maalmaha iyo wakhtiga aad soo codsaneyso lacagtaada.

1. Soo garaac taleefanka ku caawinaya:

Magaalooyinka Mataanaha iyo Nawaaxigooda:	651-296-3644
Minnesota Miyigeeda:	1-877-898-9090
Habka (TTY) dhagoolaha:	1-866-814-1252
2. Calaamadi **luuqaddaad rabto**: *Ingiriis, Isbaanish, Moong, ama Soomaali*. Haddii aad u baahan tahay luuqad kale, raac tilmaamaha ku qoran bogga 19-aad si aad ula hadasho qof shaqaale ah oo aad uga codsato turjubaan.
3. Qor **Sagaalkaaga Lambar**.
4. Geli **furehaaga** dabadeedna **taabo calaamadda afar-geeska #**.
5. Waxaa laga yaabaa in aad maqasho farriimo muhiim ah oo ku saabsan koontadaada.
6. Fariimahaas ka dib, dhageyso waxyaabaha aad kala doora karto **Ceodsoo Lacagtaad Qaadaneyso**.

Jadwalka taleefanka ee lagu codsado lacagtaad qaadaneyso

Geli Sagaalkaaga Lambar:	Soo garaac:
1, 3, ama 5	Talaado 6-da ilaa 12-ka duhurnimo
7-da ama 9-ka	Talaado 12-ka ilaa 6-da galabnimo
0, 2, ama 4	Arbaco 6-da ilaa 12-ka duhurnimo
6 ama 8	Arbaco 12-ka ilaa 6-da galabnimo
Kasta	Khamiis ama Jimce 6-da ilaa 6-da

Goorma ayaan filanayaa lacagta iigu horreysa?

Sida ugu dhakhsaha badan ee aad lacagta u heli karto waa toddobaadka saddexaad ka dib marka koontadaadu bilaabato.

- Mar kasta lacagta aad soo codsaneyso waa toddobaadkii hore. Ma soo codsan kartid lacagta toddobaadka lagu jiro ama toddobaad soo socda.
- Toddobaadka ugu horreeya ee aad lacagta xaq u yeelato **“waa toddobaad aadan lacag helikarin”** (eeg faahfahinta hoose).
- Codsadeyaasa badankooda, toddobaadka labaad ee ay lacagat xaq u leeyihiin waa toddobaadka ugu horreeya ee ay u ilaabaneysa qaadashada lacagta.
- Codsadeyaasha badankoodu waxay soo dalbadaan toddobaadka ugu horreeya ee ay lacagta helayaan ama toddobaadka saddexaad ka dib markay sameystaan koontada.

Lacagta ugu horreysa waxa ay ka soo dibdhici kartaa toddobaadka saddexaad:

- Haddii aad qaadato mushaar ka adan lacagta shaqa-la'aanta ee toddobaad kasta ama aad shaqeysay 32 saac ama wax ka badan (eeg bogga 13-aad iyo 14-aad).
- Haddii aad qaadaneysa lacago kale oo ah mushaar/dakhli (eeg bogga 14-aad).
- Haddii aadan xaq u lahayn hal toddobaad (eeg bogga 15-aad).
- Haddii aan macluumaadkaaga laga xaqiijin karin aqoonsigaaga shakhsi ahaaneed.
- Haddii aan rabno wakhti dheeraad ah oo aan ku soo helno macluumaadka aan ku gaari karno go'aanka lacagta (eeg bogga 5-aad).

Toddobaadka aan lacagta la helin

Toddobaadka koowaad ee aad xaq u yeelaneyso lacagta shaqo la'aanta waa toddobaadka mushaar-la'aanta. Sharciga Minnesota ayaa dhigaya in aan toddobaadka koowaad lacag la qaadan karin.

Si aad lacagta xaq ugu yeelato hal toddobaad, waxaa khasab ah:

- Soo-gudbinta codsiga helidda lacagta.
- Soo-gudbinta Codsiga ah qaadashaa Lacagta oo aan lala soo daahin.
- In aad xaq u leedahay toddobaadka aad lacagta soo codsatay.

Hal toddobaad oo keliya ayaan lacag la heli karin haddii la soo codsado 52 toddobaad. Haddii aadan shaqeyn mar dambe ilaa hal sano taariikhda ay lacagtu kuu bilaabato, mar dambe ma kugu dhacayso hal toddobaad oo kale oo aadan lacag heleyn.

Sidee baa laacagta ku helayaa?

Marka aad lacagta soo codsato, adiga ayaa dooran kara sida aad rabto in lagu siiyo:

- Koonto bangiga toos sida koonto caadi ah ama koontada lacag-keydiga, ama
- Kaarka Lacagta ee U.S. Bank ReliaCard® Visa® (**kaar bangi oo lagula baxo lacagta ceymiska shaqa-a'aanta**)

Adiga ayaa iska beddeli kara habka aad ku heleyso lacagtaada marka aad gasho internetka ama soo garaac adeegga macaamiishaa.

Sidee bay u shaqeysaa habka koontada bangiga tooska ah?

Haddii aar habka koontada tooska ah, lacagtaada si toos ah ayaa laguugu soo dirayaa koontadaada caadiga ah ama koontada lacag-keydsiga. Dadka badankoodu koonto ayey ugu dhacdaa sababtoo ah waa sida dhakhso badan.

- Marka aad sheegato habka koontada tooska ah, lacagtaadu waxay kugu soo gaareysaa ilaa saddex maalmood ka dib markaad soo codsato.
- Markaad mar labaad soo dirsato codsi cusub oo ah lacagta, waxaa lagaa rabaa in aad mar kale sheegato habka koontada tooska ah.
- Haddii aad iska beddesho bangiga ama koontada bangiga, xasuuso in aad beddesho habka koontada tooska ah si aysan lacagtu kaaga daahin.

Sidee buu kaarka lacagta lagu qaato u shaqeeyaa?

Waxaad isticmaali kartaa kaarka oo adigoon waxba lagaa goosan ayaad lacag kala bixi kartaa bangi kasta oo ah Visa® ama daaqadda U.S. Bank ATM Sidoo kale kaarka waxbaad kaga iibsan kartaa meherad kasta oo wax looga iibsan karo kaarka Visa®.

Waxaad boostada ku heleysaa kaarka oo ku jira bakhshad cad qiyaastii toddoba illaa toban maalmood gudahood ka dib marka lagu soo diro lacagta kuugu horreysa. Haddii aad heli weydo kaarkaaga oo lacag kuugu jirta, la xiriir taleefanka bangiga U.S. Bank ReliaCard adeeggooda macaamiishaa 1-855-233-8379. Marka kaarka lagu soo diro, waxay lacagtu ku soo galeysaa badanaa ilaa saddex maalmood ka dib markaad lacagta codsato.

Hayso kaarkaaga lacagta bangiga – waxaad u isticmaali kartaa lacagta shaqa-la'aanta ee aad u baahan karto ilaa saddex sano oo dambe. Akhriso macluumaadka la socda kaarka ee ah shuruudaha, harciga, iyo khidmadaha. Adiga ayaa masuul ka ah khidmad kasta oo lagugu soo dallacdo. Waxaad masuul ka tahay inaad ka war hayso baaqiga koontada si adan u dhaafin.

Soo sheeg wixii shaqo ah markaad soo codsaneyso lacagta shaqa-la'aanta

Mar kasta oo aad lacagta soo codsaneyso lacagta, waxaan ku weydiineynaa haddii aad shaqo heshay toddobaadka aad lacagtaada soo codsaneyso.



Haddii aad wax shaqo ah heshay, waxaa khasab ugu ah in aad soo sheegto gebi ahaan saacadaha iyo gebi ahaan lacagtaad ka heshay – toddobaad kasta. Ma dhaceysa *in laga daayo*.

Waa khasab in aad mar kasta soo sheegto:

- **Saacadaha guud ee shaqada** toddobaad kasta
- **Isugeynta dakhliga guud** toddobaad kasta ka hor intaan canshuurta laga jarin. Dakhliga waxaa ku jira mushaar kala duwan, shaah, mushaar joogto ah, khidmad, ama lacag caddaan ah; lacagta iskaa loo shaqeysto; ama qiimaha kiro, alaabo, adeegyo aar shaqo ku soo hesho.

Waxaa khasab kugu ah in aad soo sheegto dakhligaaga toddobaadka aad soo shaqeyso, ma aha toddobaadka aad lacagta ka heleyso. Meel ku qoro saacadaha aad soo shaqeyso (Axad ilaa Sabti) oo haba u eegin marka aad heli doonto lacagta saacadahaas. Haddii aad ka soo shaqeystay in ka badan hal meel haltoddobaad, isku dar dakhliga kaa soo galay saacadahaas iyo meelaha kala duwan.

Dadka Iskood u shaqeysta, ha soo sheegaan dakhligooda toddobaadkiiba mar **ka dib** marka laga jaro kharashka tooska ah ee meheradda galay toddobaadkaas. Wixii faahfaahin ah oo la xiriira in uu qof iskii u shaqeysta warbixin soo sheego, booqo www.uimn.org.

Shaqooyinkee ayaa la iga rabaa in aan soo sheego?

- ✓ Shaqo saacad la isku mushaaro
- ✓ Shaqo mushaar joogto ah
- ✓ Wixii shaah / khidmad ah
- ✓ Dakhliga shaqo ah saacado ama gaarsiis, xataa haddii aad horay uga soo shaqeystay ka hor inta aysan kugu dhicin shaqa-la'aanta shaqada kuugu weyn
- ✓ Dakhliga shaqada gaarsiiska ama shaqo kale oo aan xirfad kuu ahayn.
- ✓ Shaqada aad iskaa qabsato, shaqo ah lacag caddaan ah, ama shaqo ah is-xilqaamid
- ✓ Lacagtii kuugu dambaysay ee aad shaqada toddobaadkii kuugu dambeeyey
- ✓ Lacagtii kuugu horreysay ee aad shaqada cusub toddobaadkii kuugu horreeyey
- ✓ Tababarid ama muddo tijaabo ah goob shaqo oo cusub, mushaar ama mushaar la'aan

Sidee bay shaqadu u saameyneysaa lacagteyda?

Xaq uma lihid toddobaad kasta oo aad soo shaqeyso 32 saacadood ama wax ka badan, ama marka ay dakhligaaga hal toddobaad uu la mid yahay ama ka badan yahay lacagtaad qaadato.

Lacagta qeyb ahaan ayaan lagu heli karaa toddobaad kasta oo la shaqeyo saacado ka yar 32 oo uu dakhliguna ka yar yahay lacagta la qaadanayo toddobaadkii.

Ka warran haddii ay toddobaad kasta kala duwan yihiin saacadaha aan shaqeyo?

Haddii tirada saacadaha ee aad shaqeysay ay toddobaad kasta kala duwan yihiin, waa in aad toddobaad kasta lacagta soo codsato. Soo sheeg dakhliga guud iyo saacadaha aad shaqeyso toddobaad kasta. Barnaaijka intarnetka ayaa si toos ah u go'aaminaya haddii aad lacagta xaq u leedahay (iyo inta ay tahay lacagtaadu).

Maxaa dhacaya haddii aan soo sheegi waayo saacado iyo lacagta aan shaqeyey?

- Haddii aad soo sheegi weydo saacadaha iyo dakhliga, si degdeg ah noola soo xiriir si aan kaaga saxno wixii khalad ah.
- Haddii aad soo sheegi weydo saacadaha aad shaqeysay iyo dakhliga oo dhan, waxaa lagugu xukminayaa **lacag dheeraad ah** oo waxaa lagaa rabaa in aad soo bixiso lacagtaad qabto.
- Haddii aan soo saarno go'aan ah lacag dheeraad ah oo si khiyaamo ah lagu helay, waxaa lagugu dallacayaa ganaax ah boqolkiiba 40 iyo lacag dulsaar oo lagu sii darayo. Xaq uma yeelan kartid lacag kale ilaa aad soo bixiso lacagta lagugu leeyahay, ganaax lagaa rabo, iyo dulsaar wixii lagaa rabo. Kiisaska qaarkood waxa ay noqon karaan dambiyo la isku ciqaabo.

Dakhli kasta waa in la soo xaqiijiyo! Waxaan soo xaqiijineynaa mushaarka iyo saacadaha aad soo sheegato si aan ugu eegno macluumaadka goobahaaga shaqada.

Dakhliga saameyn kara lacagtaada

Mushaarka waxaa sii dheer dakhli kale ayaa saameyn kara lacagtaada shaqa-la'aanta. Markaad ugu horreyn codsato, iyo toddobaad kasta oo aad codsato lacagta, waxaa lagu soo weydiinayaa haddii aad codsatay ama aad hesho noocyo kale oo ah dakhli.

Hoos ka eego oocyada ugu badan ee ah dakhliga ee saameyn kara lacagtaada shaqa-la'aanta. Meeshii aad ka shaqeyn jirtay waxa ay lahaan kartaa shuruudo ka duwan kuwa halkan ku qoran, sida in aad codsato lacagta fasaxa “fasax mushaar lagu qaato”, “PTO”, ama “fasax loo qaato si shakhsi ah”. Magaca dakhligu kama muhiimsana sida, sababta, ama meesha bixineysa lacagta mushaarka ah.

Noocyada dakhliga waxaa ka mid ah; balse aysan ku ekayn waa:

- **Kala-bixidda**, mushaar ah ogeysiis, ama sii-joogid, ama lacago kale oo loo qaato sababo ah in shaqo laga tago
- **Lacagta maalmaha xanuunka** iyo **lacagta fasaxyada**
- **Lacagta fasaxa sannadk**
- **Hawlgabka** ama **lacagta 401K**
- **Magdhowga shaqaalaha** ama ceymiska kale ee shaqaalaha lacag ku bixiya mushaar la'aanta

Waa in la soo sheego dakhli kasta oo aan horay loo soo sheegin. Haddii aad su'aalo ka qabto in nooc dakhliga ka mid ah oo keliya la soo sheegayo, taleefan u soo dir Adeegga Macmiisha (eeg bogga 19-aad).


Haddii uu lacagta shaqa-la'aanta saameynayo dakhli kasta, waxaa laguu soo dirayaa go'aan faahfaahinaya saameyntaas.

Fahamka sharuudaha u qalmida isbuuclaha

Maxaan u baahannahay inaan sameeyo isbuuc walba?

Si aad ugu qalantid faa'idooyinka isbuuc walba, ee ah inaad:

- Soo-gudbiso Codsii ah qaadashaa Lacagta oo ah wakhti sax ah (eeg bogga 8aad).
- Kuu suurtoogasho oo aad rabtid inaad isla markaasba ogolaatid ka shaqeynta shaqadaada joogtada ah ama shaqooyin kale ee kugu haboon.
- Raadi shaqo oo ogolow inaad ogolaatid saacadaha, mushaarka, baaxada safarka, iyo sharuudaha kale ee shaqada ee caadiga u ah qof ku jiro shaqadaada iyo xirfadahaaga iyo waaya aragnimada.



Lacagta xaq **uma** lihid toddobaadyo:

- Aad ku safreyso meel ka baxsan deegaankaaga, haddii aysan sababta safarku ahayn mid shaqo la xiriirta.
- In ay ku hayso xaalado caafimaad ama xaalado kale oo kaa hor istaagi kara in aad shaqo bilowdo ama aad shaqo raadsato.

Waa in aad si joogto ah u raadisato shaqo xataa haddii aad shaqeyso saacado ama aad filaneyso in aad ku laabato shaqo ah nooca xiliyada. Waa inaad sameyso dedaal dhab ah oo aad shaqo ku heli kartid toddobaad kasta oo aad lacagta codsaneyso.

Sidee bay in iskuul la dhigto u saameyneysaa lacagta la qaadanayo?

Haddii aad iskuul dhigato, waa in aad si joogto ah shaqo u raadsan karto oo aad iskuulka joojin karto haddii ay muhiim kuu tahay in aad shaqadaada wadato. Haddii lagu oggolaado tababar ama waxbarasho buuxda, markaas waxaa lagaa deynayaa sharuudihii shaqa-raadiska.

Joojinta iyo bilaabashada lacagta shaqa-la'aanta

Ka warran haddii aan shaqo ku laabto?

- Markaad ku laabato shaqo buuxo ama aad joojineyso codsigaaga lacagta, sabab kasta oo jirta, sameyso codsigaaga ugu dambeeyo oo ka dibna iska jooji codsiga dambe. **Uma baahnid in aad na soo ogeysiiso in aad shaqo ku noqotay.**
- Haddii aad ka bilowdid shaqo shaqadaada cusub bartamaha isbuuca, soo wargeli saacadahaaga aad shaqeysay iyo daqliyadaada isbuuca, xittaa haddii aanan weli lagu siinin. Waxaad xaq u yeelan kartaa in aad hesho lacagtaada qeyb ahaan.
- Xusuusnow in aad soo sheegto saacada aad shaqeyso iyo mushaarkaaga, xataa haddii aadan weli mushaar qaadan. Waxaa ka mid ah saacadaha aad shaqeysay iyo mushaarka ah shaqo saacado ah ama shaqo meelgaar ah.
- Waa in aad meel fiican ku xafidato furehaaga iyo kaarka lacagta shaqa-la'aanta (haddii aad haysato) si aad mar kale u isticmaasho mustaqbalka.
- Cinwaanka kuu qoran iska hubso in uu sax yahay ugu yaraan afar sano ka dib codsigii kuugu dambeeyey ee aad lacag ku qaadatay. Xittaa kadib markaad joojiso codsashada faa'idooyinka, akoonkaaga waala baari karaa ama waxaan u baahan karnaa inaan kuula soo xiriirno sababo kale. Haddii aanan ku soo wicii karin, natiijooyinka hantidhowrida ayaa la sameynayaa iyada oo aan talladaada jirin oo adiga ayaa masuul ka noqonayo wuxuu lacag bixin dheeraad ah ee laga yaabo inay sababto.

Ka warran haddii ay mar kale shaqo la'aan igu dhacdo?

Ka gal akoonkaaga www.uimn.org ama soo wac nidaamka taleefonka tooska ah (fiiri bogga 19). Waxaa lagu tilmaamayaa midkood dib u furida akoonkaaga ama codsashada akoon cusub. Si kasta waa inaad diyaar u ahaato in aad soo sheegto faahfaahinta shaqadii kuugu dambeysay. Xusuusnow in aad hubsato sida laguula soo xiriirayo, canshuurta lagaa goynayo, iyo in ay sax kuu tahay koontada laguula soo gelayo lacagta.

Haynta ka imaaneyso faa'idada lacag bixinta

Canshuuraha daqliga

Faa'idooyinka shaqo la'aanta waa **daqliga la canshuuri karo** sida waafaqsan sharciga faderaalka iyo gobolka Minnesota. Eeg ama beddel canshuurta lagaa goynayo adigoo gelaya kadinkaaga ama koontadaada inarnetka www.uimn.org ama soo garaac taleefanka jawaabaha lagu sii duubay (eeg bogga 19-aad)

Kama daahsanaan karto Janaayo 31, Foomka IRS 1099-G waxaa laguugu soo dirayaa ciwaanka la garanayo ee ugu dambaysay, iyada oo muujineyso faa'idada guud ee adiga lagu siiyay inta lagu jiray sannadka hore iyo haynta canshuurta daqliga faderaalka iyo gobolka. Waxaad arki kartaa oo aad daabacan kartaa foomka waraaqda ee 1099-G adigoo galaya kadinkaaga intarnetka www.uimn.org.

Lacag bixinta dheeraadka ah

Haddii si dheeraad ah lagu siiyay faa'idooyinka shaqo la'aanta ee Minnesota ama gobolka kale oo aadan dib u bixin, waxaan kaa jareynaa midkood boqolkiiba 50 ama 100 ee faa'idooyinka lacag bixinta isbuuc walba oo codsatid haraaga aad qabtid.

Taageerada canuga

Haddii lagaa rabo inaad bixisid taageerada canuga oo maxkamad ahaan ama hay'ada fullinta kale, lacag bixinada taageerada canuga waxaa laga jarayaa tirada faa'idada isbuuclahaada oo u soo diro taageero canuga. Haddii aad aaminsantahay in taageero badan oo canuga in laga jaray ama haddii aad su'aalo qabtid, la xiriir hay'ada taageerada canuga ee fullineyso amarka taageerada.

Caawinta Dib u shaqaaleysiinta

Waxaa **lagugu khasbi karaa** in aad qaadato Xiisad Shaqa-raadis ah. Xiisadahaas waxa ay dadka ku caawiyaan in ay helaan shaqo oo waxaa lagu xiraa macluumaadyo ay ka mid yihiin CareerForce – oo ah goobta Minnesota ee laga shaqooyinka.



Shaqo raadinta waa shaqadaada waqtiga buuxo adiga oo helayo faa'idooyinka shaqo la'aanta. Helida shaqadaada xigta waxay noqon kartaa caqabad. Waxaad u baahantahay inaad garanaysid qaababka raadinta shaqada ee ugu dambeyso oo la soco isbadelada suuqa shaqada. Caawinta dib u shaqaaleysiinta waa la heli karaa si loo hubiyo inaad haysatid qalabyada aad u baahantahay inaad shaqada ugu laabatid.

Haddii lagu qabto ballan ah Xiisadda Shaqa-raadiska:

- **Ka-qeybqaadashadu waa khasab.** Qofkii ka qeybqaadan waaya waxaa **loo diidayaa lacagta.**
- Waxaa lagu soo dirayaa waraaq ogeysiis ah, farriimo aad ku hesho kadinkaaga internetka, iyo markaad taleefan soo dirto.
- Waxaad sidoo kale ka heleysaa fariin akoonkaaga oo ku weydiineyso inaad dhameystirtid Shaqo Raadinta Is qiimeynta iyo Qorshe Raadinta Shaqada ah.

Shaqaalaha CareerForce ayaa kaacaawinaaya:

- Qiimeynta baahiyada raadinta shaqadaada
- Kuu diyaariyo qorshaha dib u shaqaaleysiinta

Adeegyada iyo tababarada xarumaha CareerForce ayaad si bilaash ah kuhelaysaa waxayna kaacaawin karaan:

- Qorida dulmarka waaya aragnimada
- Wareysi
- Siyaabaha kale ee shaqa-raadiska

Adeega macmiilka xiriirka

Haddii aad su'aal qabto, kala hadal Ceymiska Shaqa-la'aanta (UI) Shaqaalaha Adeegga Macaamiisha. Kaliya Wakiilka Adeega Macmiilka UI ayaa siin karo jawaabo saxan su'aalaha caymiska shaqaadaada.

Adeegga Macaamiisha waxay shaqeeyaan Isniin ilaa Jimce, 8-da ilaa 4:30.

Taleefanka jawaabaha duuban waxaa la soo garaaci karaa 6-da ilaa 6-da.

Si aad shaqaale ula hadasho:

1. Soo garaac taleefanka ku caawinaya:

Magaalooyinka Mataanaha iyo Nawaaxigooda: 651-296-3644

Minnesota Miyigeeda: 1-877-898-9090

Habka (TTY) dhagoolaha: 1-866-814-1252

2. **Calaamadi luuqaddaad rabto:** *Ingiriis, Isbaanish, Moong, ama Soomaali.*

Haddii aad rabto luuqad kale, waxaad turjubaan ka codsan kartaa marka aad la hadasho shaqaalaha.

3. Qor **Sagaalkaaga Lambar**.

4. Geli **furehaaga** dabadeedna **taabo calaamadda afar-geeska #**.

AMA - Haddii aan lagu weydiin **furehaaga in aad geliso, taabo lambar 2, ka dibna taabo lambar 0** si aad qof ula hadasho.

5. **Taabo 2** oo dhageyso waxyaabo kale.

6. **Taabo 3** oo dhageyso su'aalo iyo jawabo guud. Si aad qof ula hadasho, **taabo 0**.

Booqo www.uimn.org oo akhriso su'aalo iyo jawabo guud. Meeshan waa meesha rasmiga ah ee keliya ee laga helo macluumaadka manaafacaadka. Taxaddar u yeelo markaad akhrisaneyso macluumaadka baraha xiriirka bulshada, oo badanaa ma aha wax sax ah.

Ciwaanka Boostada iyo Lambarka Fakiska

UI Customer Service

P.O. Box 4629

St. Paul, MN 55101-4629

Fax: 651-205-4007

Caawiska helida shaqadaada xigto

Raadiyayaasha shaqo guul ah waxay maamuleen xirfadaha iyo aqoonta loogu baahanyahay in lagu guuleysto in shaqada xigto. Waa inaad:

- Ula dhaqantid raadinta shaqadooda sida shaqo.
- U fikir sida badrooni oo ogow waxa badrooniga raadinayo.
- Geli waqtiga ugu badan ee raadinta shaqo sida ay ahaan laheyd waqtiga shaqada.
- Qorsheey howlaha shaqo raadintooda.
- Xiriir sameey si aad u heshiid shaqooyin ee suuqa shaqada qarsoon.

Shaqa-raadinta intarnetka casharro ah eLearning

Eeg www.uimn.org/applicants oo guji **Hel Shaqo**.

Casharada Isdhexgalka Oonleenka ayaa diyaar ah kuwaasoo lagu barto xirfadaha shaqo barista. Fasal walba waxaa loo qeybiyay mowduucyo oo ay ku jiraan waxbarashada, isdhexgalka, iyo howlaha waxbarashada.

Hordhaca Raadiska Shaqada - Shaqo in la raadsado waa dhib. Shaqo raadin wax ku ool ah waxay u baahantahay cilmi iyo xirfad. Baro wax ku saabsan halka dadka ay shaqada ka helaan, waxa badrooniga filanayo, sida loo maamulo qasaaraha shaqada iyo isbadelka, iyo xeeladaha shaqo raadin guul ah.

Galaaska Arjiga-shaqada - Arjiga shaqada waa aalad muhiim u ah si aqoontaada loo tuso suuqa shaqada iyo shaqa-bixiyayaasha. Baro sida aad u qoran karto arji-shaqo oo u isticmaal shaqa-raadiskaaga.

Xiriirka Meelaha - Xiriirka meelaha waa mid ka mid ah xeeladaha ugu fiican ee shaqo lagu helo. Galaaskan ku baro manaafacaadka meelaha iyo dadka lagu xirnaado.

Wareysi - Wareysiga shaqa-bixiyaha waa kulan lagu yeesho goob shaqo si aad ugala hadasho aqoontaada iyo waaya-aragnimadaada. Shaqa-bixiyaha ayaa kugu baranaya adia iyo sida aad shaqada ugu fiican tahay, oo waa fursad aad adiguna ku baraneyso meesha aad ka shaqeyneyso iyo haddii ay kugu fiican tahay. Baro sida si wax ku ool ah loogu wareysto oo aad ugu guuleysatid shaqada.

Kaalmo Dhaqaale iyo Adeeg Dadweyne

Faa'idooyinka Caymiska Shaqa la'aanta way ku caawin kartaa inta aad shaqada xigta raadineysid. Waxaa jira caawimaad kale oo aad heli karto.

Eeg barta www.uimn.org, guji **Codsadeyaasha**, dabadeedna guji **Caawimaad iyo Taageero**, dabadeedna **Kaalmo Dhaqaale iyo Adeeg Dadweyne**.

The screenshot shows the Minnesota Unemployment Insurance website. The navigation menu on the left includes: Home, Applicants, Employers & Agents, What do I need to know?, How do I apply?, How do I get paid?, What affects my benefits?, How do I appeal?, Video library, **Help & Support** (circled in red with an arrow), and Contact us. The main content area features a video player with a woman speaking, a section for 'Unemployed? We Can Help.' with a sub-headline 'We provide financial help to thousands of qualified persons out of work.', and a section for 'Lost Wages Assistance' with a sub-headline 'Minnesota has paid six weeks of Lost Wages Assistance to eligible applicants. Your bank may take a few extra days to process the payments. Learn more.' The page also has a 'Welcome Applicants!' section and a 'Quick Links' section with a link for 'COVID-19 and unemployment benefits'.

Halkan ayey ku qoran yihiin macluumaadka ku qoran boggaas:

- **Cunto** – ka eego macluumaad cunto looga helo Minnesota www.hungersolutions.org ama soo garaac khadka cuntada oo ah Minnesota Food Helpline 1-888-711-1151.
- **Daryeelka Caafimaadka** – MNSure waxay dadka Minnesota oo dhan ku caawineysaa in ay helaan ceymis oo ay ku sii jiraan ceymis caafimaad oo la awoodi karo oo dhammeystiran. MNSure.org waa meesha keliya ee aad ka heli karto qiimadhimis aad isaga yareyso kharashka adigoo eegaya in aad xaq u yeelan karto ceymis qiima jaban ama aan lacag lagaa rabin oo lagu helo ceymisyada Medical Assistance ama MinnesotaCare. Hel adeeg bilaash ah, ha lagu caawiyo markaad codsaneyso oo iska diiwaangeli barta www.mnsure.org/free-help ama soo garaac 1-855-366-7873.
- **Lacagta korontada** – Lacagta Kaalmada Korontada (EAP) waxaa dadka lagu caawiyaa kharashka korontada iyo sameynta kuleyliyaha guryaha dakhli ahaan xaq ugu yeesha. Soo garaac 1-800-657-3710 ama booqo www.mn.gov/commerce, guji Consumers (Codadaha), dabadeedna Consumer Assistance (Caawimaadda Codsadaha).
- **Hawlgabka Ciidanka** – Waaxda Hawlaha Hawlgabka Ciidanka Minnesota (MDVA) waa hay'ad u adeegta hawlgabka iyo qoysaskooda. Faahfaahin ka eego www.mn.gov/mdva ama soo garaac 1-888-546-5838.

Takoorida

Waaxda Shaqada iyo Hormarinta Dhaqaalaha Minnesota waxaa ka go'an fursado loo siman yahay, sameyn ah wanaag, iyo dadkoo dhan oo ka muuqda.

Haddii aad u maleyneyso in Waaxda Shaqada iyo Hormarinta Dhaqaalaha Minnesota (DEED) kugu takoortay sabab ah isir, midab, caqiido diimeed, jinsi (wax la mid ah oo aan ku koobneyn dacaayad jinsiyeed, xaalad ah beddelashada jinsiga, ama aqoonsi jinsiyeed), xaalad xaas ahaaneed, xaalad qoys ahaaneed, dalkaagii asalkii hore (ama in ay yar tahay aqoontaada afka Ingiriiska), da', naafanimi, qaadashada kaalmo dowladeed intii aad qaadaneysay lacagta ceymiska shaqa la'aanta, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska DEED ee Dadkoo Dhan iyo Fursadaha Loo Siman Yahay:

MN Department of Employment and Economic Development Office of Diversity and Equal Opportunity

Dhismaha Great Northern Building - Dabaqa 13aad

180 East Fifth Street

St. Paul, MN 55101-1678

Taleefanka: 651-259-7094 | Fakis: 651-297-5343

DEED.ODEO@state.mn.us

Wixii faahfaahin ah ka eego:

<https://mn.gov/deed/about/what-guides-us/equal-opportunity>

Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ama DEED waa meel laga helo fursado adeegyo iyo kuwa shaqo oo loo siman yahay.

Xaquuqda arimaha gaarka ah

Barnaamijka Caymiska Shaqo la'aanta Minnesota waxaa ka go'an inay ilaaliyaan arimahaaga gaarka ah. Warbixinta aad sheegtay waxaa loo isticmaalayaa in lagu go'aansado u qalmidaada faa'idooyinka caymiska shaqo la'aanta iyo caawinta shaqo raadinta. Warbixinta lookala soocay inay tahay gaar lama siideyn karo iyada oo aan jirin ogolaanshahaaga oo qoran aan ka aheyn sida lagu sheegay sharciga gobolka iyo faderaalka.

Qaababka (akhriska) kale

Barnaamijka Caymiska Shaqo la'aanta waxaa ka go'an inuu siiyo helitaanka qof walba. Macluumaadka buugyarehan waxaa qaabab kale lagu heli karaa marka la soo garaaco 651-259-7223 ama lala soo xiriiro ui.mn@state.mn.us.

Noo soo sheeg haddii aan sii hagaajin karno buugyarehan.

Fariin noogu soo dir: ui.mn@state.mn.us.

Ama waraaq noogu soo dir:

Minnesota Unemployment Insurance Program
Attn: Communications Unit
P.O. Box 4629
St. Paul, MN 55101-4629



Si BILAASH ah ku ogow fursadaha shaqada oo adigu bilaabo shaqa-raadiskaaga

Haddii aad rabto in aad si dhakhso ah u hesho shaqo ama aad rabto in aad sahamiso fursadaha shaqooyinka, CareerForce ayaa ku caawineysa.

CareerForce waa goobta rasmiga ah ee gobolka looga raadsado tasiilaadka shaqada. Waxaa jira in ka badan 50 xarumood oo ah CareerForce oo ka furan Minnesota oo dhan.

Adeegyada CareerForce waxaa lagu heli karaa intarnetka, taleefanka, iyo in xafiiska la yimaado – oo qofna lacag lagama rabo!

CareerForce waxay haysaa barnaamijyo iyo adeegyo aad u fara badan

- Kumanaan shaqo oo ah hadda oo la soo geliyo intarnetka oo laga helayo gobolka
- Carwooyinka shaqada oo lagula kulmi karto shirkado shaqo oo hadda dad qoranaya
- Tababarid ah qorista arjiga-shaqada, iyo xirfado kale oo ah shaqa-raadis
- Caawimaad shakhsi ahaaneed oo laga helayo shaqaalaha CareerForce, sida eegista arjiga shaqada, iyo sida la isugu diyaariyo wareysiga shaqada.
- Qorsheyn ah yoolka shaqo muddo dheer socota, sida qiimeynta xirfadaha iyo waxa la xiiseynayo.
- Macluumaadka shaqada suuqa oo kaa caawinaya hagista qorshahaaga shaqo
- Tobabar fursado xirfadeed oo looga baahan yahay shaqooyinka la raadiyo
- Kaalmo dhaqaale oo ah tababar xirfadeed iyo waxbarasho uu oggolaado la-taliyaha oo xaq loogu yeesho Barnaamijka Dadka Minnesota ee Shaqada Laga Eryey.
- Macluumaadyo loo hayo hawlgabka ciidanka, naafada, dadka ah Mareykanka cusub, dhallinta, dadka ka weyn 50 sano, iyo dadka loo soo xiray danbiyada waaweyn.
- Iyo wax badan!

Booqo [CareerForceMN.com/locations](https://www.careerforcemn.com/locations) si aad u hesho macluumaadka goob kuu dhow oo ah CareerForce!

Ama soo garaac 651-259-7500 si lagu caawiyo.

PRESORTED
FIRST-CLASS MAIL
U.S. POSTAGE PAID
TWIN CITIES, MN
PERMIT NO. 8717

Ka hel warbixin badan onleenka ee:

www.uimn.org

Español

Esta información está disponible
en Español en el internet a
www.uimn.org/applicants/language/spanish.jsp

Hmoob

Cov ntaub ntawv no tseem muaj sau uas ntawv
hmoob nyob rau txoj sab internet ntawm
www.uimn.org/applicants/language/hmong.jsp

Soomaali

Macluumaadkan oo ah Soomaali
waxaad ka heli kartaa barta internetka
www.uimn.org/applicants/language/somali.jsp

Macluumaadka ku qoran buugyarehan waxaa lagu heli
karaa siyaabo kale (oo loo akhrisan karo) balse waa in la
soo garaaco 651-259-7223.